

# Waa maxay Macalinka Family Day Care?

SOMALI



Australian Government  
Department of Education and Training



NSW FAMILY DAY CARE  
ASSOCIATION INC.

## QALABKA MACALINKA FAMILY DAY CARE:

# Waa maxay Macalinka Family Day Care?

Macalinka Family Day Care waa qof bixiya waxbarashada carruurnimada hore ee la oggolaaday iyo daryeelka carruurta (inta badan carruurta yar ee weli bilaabay dugsiga) ee lagu siiyo guriga macalinka.

Adeegyada Family Day Care wuxuu ka shaqeeyay Australia in ka badan 40 sanno. Qoysaska waxay ka diiwaangeliyaan carruurtooda daryeelka qoyska maalinta ee Family Day Care iyaga oo shaqeynayo, tababaranayo ama wax baranayo.

### **Macalimiinta Family Day Care waxay ku bixiyaan waxbarashada carruurnimada hore ee la oggolaaday iyo daryeelka carruurta goobaha guriga**

Noqoshada macalinka Family Day Care waxay noqon kartaa qaab wanaagsan oo daqli lagu helayo. Waxaad masuul ka noqon kartaa noloshada shaqada adiga oo daryelayo oona ku waxbarayo gurigaaga. Waxaad sidoo kale ku caawineysaa qoysaska carruurta in ay ka qeybgalaan balanqaadyada shaqada ama waxbarashada.

Sida macalinka Family Day Care waxaad daryeeli kartaa illaa todoba carruur ah (oo ay ku jiraan carruurtaada gaarka ah ee ka hooseeyo 13 sanno jir) oo aanan la heyn wax ka badan afar carruur oo da'da dugsiga barbaarinta ama ka hooseeyo ah.

Daryeelida carruurta waa shaqo muhiim ah. Waxaad isbadel ku sameyn kartaa nolashooda adiga oo siinayo daryeel tayeysan iyo waaya aragnimada waxbarashada ee jawi badbaado ah.

Macalimiinta Family Day Care waxay sameeyaan wax ka badan la ciyaarida carruurta. Waxay ku taageeraan waxbarashada carruurta dhinaca dooqyada ciyaarta ay sheegaan sidoo kale waxay masuul ka yihiin caafimaadka canug walba iyo daryeelka ay ugu jiraan daryeelkooda.

### **Macalimiinta Family Day Care waxay ugu xiranyihiin qoysaska dhinaca adeega Family Day Care**

Sababtoo ah daryeelida carruurta waa sida shaqo muhiim ah, marka aad noqotid macalinka Family Day Care, waa inaad marka koowaad ka qeyb noqotaa adeega Family Day Care ee la ansixiyay. Adeega Family Day Care waxay ku siinaysaa taageero iyo tababar oo adiga kuu soo gudbiyaan qoysaska. Waxay sidoo kale eegayaan sida aad u daryeeleysid waxna u bartid carruurta daryeelkaaga ku jira. Waxay sidoo kale helaan qidmooyinka ka imaanayo waaladiinta kadibna adiga ku siinayaan. Waxay sidoo kale maamulaan qidmada daryeelka carruurta Dowlada Australia ee matalaada u qalmida qoysaska.

Waa dooqaaga ee adeega Family Day Care ee aad iska diiwaangelisay. Waa muhiim inaad dooratid adeega Daryeelka Maalinta Qoyska ee aad aaminsantahay si lagu taageero oo aad waxa saxan u sameysid.

Adeegyada Family Day Care waxay uga hawl galaan macalimiinta sida midkood shaqaalaha ama qandaraaslayaasha ganacsiga yar. Ka shaqeynta ganacsiga Family Day Care waa sida ka shaqeynta ganacsigaaga yar ee guriga ka socdo.

Adeegyada Family Day Care waa in ay hubiyaan in macalimiintooda u hogaansamaan dhammaan xeerarkooda IYO nidaamyada iyo Sharciga Caawinta Qoyska.

### **Dowlada waxay bixisaa kaalmada hoose ee qoysaska isticmaalayo Family Day Care la ansixiyay**

Dowlada Australian ayaa siiso qoysaska u qalmo iyaga oo isticmaalayo Family Day Care ee kaalmada si loogu caawiyo yareynta qarashka qidmada dalacaada adeegyada. Sida macalinka Family Day Care, waxaad u baahantahay inaad joogteysid diiwaanada ka qeybgal saxan oo canug walba ee adiga ku daryeelo, si loo hubiyo in adiga iyo adeega Family Day Care ma jabineyso sharciga Caawinta Qoyska.

## Waxaa jiro Heerka Tayada Qaranka ee waxbarashada iyo adeegyada daryeelka

Sababtoo ah waa muhiim in carruurta helaan waxbaarshada ugu wanaagsan iyo daryeelka suurtogalka ah, waxaa jiro nidaam diyaarsan oo hubinayo in waxbarashada ugu badan iyo adeegyada daryeelka, oo ay ku jiraan , waxay ka shaqeynayaan si ay sare ugu qaadaan tayada waxbarashada iyo daryeelka carruurta helaan. Waxaa jiro heerka ugu yar ee ah in dhammaan adeegyada waxay ka shaqeyneysaa dhaafinta – Heerka Tayada Qaranka ee Waxbarashada iyo Adeegyada Daryeelka.

Heerka Tayada Daryeelka waxay ku caawisaa macalimiinta inay fahmaan inay bixiyaan waxbarashada ugu wanaagsan iyo daryeelka oo jawiga ugu suurtagashan oo carruurta lagu taageerayo in carruurta ay hormariyaan barasho iyo koriin.



## QODOBO MUHIIM AH

- ▶ Macalimiinta Family Day Care waxay bixiyaan waxbarashada carruurnimada hore iyo daryeelka ee carruurta dadka kale kuwaas oo lagu bixiyo guriyaha macalimiinta.
- ▶ Macalimiinta waxay la diiwaangashantahay oo ku shaqeeyaan sida waafaqsan jaheynta iyo taageerada adeega la ansixiyay.
- ▶ Adeegyada Daryeelka Maalinta Qoyska ayaa ka macalimiinta sida midkood shaqaalaha ama qandaraaslayaasha ganaCsigay yar.
- ▶ Dowlada Australian ayaa siiso daryeelka carruurta kaalmada qoysaska u qalmo inay ka caawiso qarashaadka Family Day Care la ansixiyay. Adeega Family Day Care waa inuu u gudbiyaa kaalmada sida dhimista qidamada ee qoysaska doortay dooqaan.
- ▶ Macalin ahaanshaha waa shaqo abaalmarin leh. Waxaad sameyn kartaa kala duwanaansho adiga oo siinayo carruurta daryeel tayo leh iyo waayo aragnimo shaqo ee jawi badbaado ah.
- ▶ Family Day Care si sareysa ayaa loo sharciyeeyay – macalimiinta iyo adeegyada waa inay u hogaansamaan inta sharciyo iyo sharciyada si loo hubiyo hufnaanta kaalmada Dowlada Australian iyo si loo hubiyo in carruurta si wanaagsan loogu daryeelay jawi badbaado ah
- ▶ Waa muhiim inaad fahmeysid waxa aad qaadaneysid marka aad noqotid macalinka Family Day Care. Waxaad u baahantahay in aad tixgelisid dhaqaalaha iyo qeybaha sharciga ee – haddii aad qabtid wax shaki ah ee ku saabsan waxa lagu weydiyay in aad ku sameysa adeega Family Day Care, weydii.
- ▶ Haddii aad u maleysay in lagu weydiyay inaad sameysid wax qiyaano ah ama sharciyada ka soo horjeedo, waxaad talo u soo wici kartaa talo **1800 664 231** ama i-meelka: **tipoffline@education.gov.au**
- ▶ Wadada ugu wanaagsan ee lagu hubinayo in laguugu taageeray shaqadaada sida macalinka Family Day Care iiska diiwaangeli adeega Family Day Care ee ku taageerayo adiga iyo mid aad aamini kartid.

# Su'aalaha inta baddan la weydiyo

## Miyaan u baahanahay shahaadooyino

Waxaad u baahantahay inaad haysatid ama aad ka shaqeyneysid dhinaca shahaadooyinka – Shahaadada la ansixiyay III ee Waxbarashada iyo Adeegyada Daryeelka. Shahaadadaan ee aad ku baran kartid dhinaca kulliyada TAFE ama hay'ada tababarka diiwaangashan, waxay ku caawineysaa sare u qaadida xfadahaada daryeel siinta iyo waxbarashada carruurta yar.

## Maxaa kale ayaan u baahanayaa inaan sameeyo?

Waxaad u baahantahay inaad:

- ▶ La lahaatid la Shaqeynta cadeynta Baaritaanka Carruurta
- ▶ Laga diiwaangeliyay adeega Family Day Care. Waxay kugu taageerayaan oo ay kugu caawinayaan ilaalinta daryeelka aad carruurta siisid.
- ▶ Leedahay shahaadooyinka hadeer ee gargaarka koowaad (oo ay ku jiraan shahaadada CPR iyo tababarka maamulka degdega ee neefta iyo falcelinada alaarjiga).
- ▶ Leeyahay caymiska masuuliyada bulshada.
- ▶ Ka qeybqaadashada hormarinta xirfadlaha iyo tababarka aqoon isweedaarsiyada.
- ▶ La shaqeynta carruurta ee qaababka lagu tilmaamay Heerka Tayada Qaranka ee waxbarashada iyo daryeelka, iyada oo la isticmaalayo manhajka la anxixiyay.
- ▶ Hubi inaad raacdid Sharciga Qaranka iyo sharciyada oo waxay u hogaansamaan Sharciga Caawinta Qoyska.

## Intee lacag ah ayaan helayaa?

Adeegyada Family Day Care waxay dajiyeen qiimahooda gaarka ah ee lacagaha gaarka ah. Lacagta waxay u dhigantaa ama waxyar ka badan tahay waxa macalimiinta ka shaqeynayo xarumaha daryeelka carruurta ay helaan.

## Miyaan u baahannahay inaan helo gurigeyga gaarka ah?

Maya. Haddiiba carruurta si badbaado ah loogu daryeeli karo adigana waxaad

leedahay boos ku filan, dhibaato malahan haddii guriga aad adiga leedahay ama aad kireysatay. Waa inaad hubisaa, si kastaba, haddii aad u baahantahay inaad ogolaansho ka aragtid wakiilkaaga kirada.

## Imisa carruur ayaan daryeeli karaa?

Tirada carruurta aad daryeeli kartid sharciga ayaa lagu dajiyay. Hadeer waad daryeeli kartaa illaa todoba carruur (oo ay ku jiraan carruurtaada gaarka ah ee ka hooseeyo 13 sanno jir) oo aanan la heynt wax ka badan afar carruur oo ah da'da dugsigu barbaarinta ama ka hooseeyo.

## Waa maxay sharciyada iyo sharciyada dabool Family Day Care?

Waxaa jiro tiro sharcio ah kuwaas oo maamula sida adeegyada Family Day Care iyo macalimiinta u shaqeyaan. Sharciyada ugu muhiimsan waa:

- ▶ **Adeegyada Waxbarashada iyo Daryeelka Sharciga Qaranka**  
[www.acecqa.gov.au/national-law](http://www.acecqa.gov.au/national-law)
- ▶ **Adeegyada Waxabarshada iyo Daryeelka Xeerarka Qaranka**  
[www.acecqa.gov.au/national-regulations](http://www.acecqa.gov.au/national-regulations)
- ▶ **Sharciga Caawinta Qoyska**  
[www.education.gov.au/family-assistance-law](http://www.education.gov.au/family-assistance-law)

## KA OGOW WAX BADAN

Ma danaysaa? Ka ogow wax badan adiga oo booqanayo websaydka xigga:

- ▶ [www.education.gov.au/family-day-care](http://www.education.gov.au/family-day-care)
- ▶ [www.fdcsupport.org.au](http://www.fdcsupport.org.au)
- ▶ [www.fdca.com.au](http://www.fdca.com.au)
- ▶ [www.acecqa.gov.au](http://www.acecqa.gov.au)

ama adiga oo booqanayo adeega Family Day Care ee adiga kuu dhow. (Si aad u oggaatid adeega kuugu dhow, booqo [www.fdca.com.au](http://www.fdca.com.au) oo riix 'badhanka 'find childcare'.)



Australian Government  
Department of Education and Training



NSW FAMILY DAY CARE  
ASSOCIATION INC.